

Kitaabka Quduuska ah ee Carruursha
waalidsha



Nuux
iyo Daadkii
weynaa



May kiin qoray: Edward Hughes

Sawiri: Byron Unger; Lazarus
Alastair Paterson

Wala kii habeeyay: M. Maillot; Tammy S.

May kin turjumey: www.christian-translation.com

Wala soo saray: Bible for Children
www.M1914.org

©2021 Bible for Children, Inc.


Shati: May xaq inlataa ini ada nugul kusameysati ama daabacati
sheekadun ilaa inti ada in gadanah.



Nuux wuxuu ahaa nin
Ilaahay caabuda.
Dadka kale oo dhami
way necbeen oo
caasiyeen ilaahay.

Maalin maalmaha
ka mid

ah, ayaa Eebbe
yidhi wax
laga naxo.




"Waan baabbi'in doonaa
dunidan sharka ah,"
Ilaah ayaa u sheegay
Nuux. Qoyskaaga oo
keliya ayaa badbaadi
doona."



Ilaah wuxuu Nuux uga digay
daad weyn inuu yimaado oo
dhulka qariyo.



"Nuux samayso dooni alwaax ah,
doon weyn oo ku filan goyskaaga
iyo xayawaan badan," Ilaah
wuxuu Nuux siiyay tilmaamo
sax ah. Nuux mashquul
buu galay!



Dadku waxay u
badan tahay inay
ku jees jeesi
jireen
sida

Nuux u
sharraxay
sababta uu doon
u samaynayo.



Nuux wuu sii
waday dhismaha.
Isaguna dadka
ayuu

Ilaahay uga
sheekayn jiray.
Cidna ma
dhageysan.



Nuux wuxuu lahaa rumaysad weyn. Wuu rumeeyey Ilaah inkasta oo roob uusan horay u di'in. Markiiba doontii ayaa diyaar loo ahaa in lagu raro alaab.




Hadda waxaa yimid xayawaankii.
Ilaah wuxuu keenay toddobo ka mid
ah noocyada qaar, laba kalena.




Shimbiraha waaweyn iyo kuwa yaryar,
xayawaanada yaryar iyo kuwa dhaadheer
ayaa waxay aadeen dhanka doonta.




Malaha dadku waxay ku qaylinayeen
aflagaado Nuux intuu xoolaha
raray. Kama joojin dembiga ay
Ilaah ka galeen. Iyagu ma ay
weydiisan in ay galaan
doonnida.





Ugu
dambayntii,
dhammaan
xayawaankii
iyo haaddii ayaa
dusha laga saaray.
"Soo gal doonnida," Ilaah
wuxuu u yeedhay Nuux.






"Adiga iyo
qoyskaaga."
Nuux,
afadiisii,
saddexdiisii wiil iyo
naagahoodiiba doonnidii
bay galeen. Markaasuu
Ilaahay albaabkii xidhay!




Kadib roobkii ayaa
yimid. Roob weyn ayaa
dhulka qooyay afartan
maalmoood iyo habeenno.





Daadad
ayaa ku
shubay
magaalooyin iyo
tuulooyin. Markii roobku
joogsaday, xataa buuraha biyuhu
way ku hoos jireen. Wax kasta oo
hawadu neefsatay way dhinteen.






Markay biyihii kaceen,
doonnidii ayaa dul
sabbaysay. Waxaa laga
yaabaa inay gudcur ku
jirtay gudaha, laga
yaabee inay kacsan
tahay, iyo xitaa
cabsi. Laakiin
doonnidii ayaa Nuux
ka magan gelisay
daadka.



Kadib shan bilood oo daad ah,
Ilaah wuxuu soo diray dabayl
qallajinaysa. Si tartiib ah,
doonnidii waxay ugu
fadhiisatay
buuraha
Ararat.



Nuux wuxuu sii joogay
afartan maalmood oo
kale markii biyuhu hoos
u socdeen.



Nuux wuxuu diray daaqad furan oo ka mid ah tuke iyo qoolley. Qoolleydii ma helin meel qalalan oo nadiif ah oo ay ku nasato, qoolleyduna waxay ku noqotay Nuux.



Toddobaad ka dib,
Nuux mar kale ayuu
isku dayay. Qoolleydii
waxay la soo noqotay
caleemo saytuun
ah afkeeda.





Toddobaadkii xigay
Nuux wuxuu ogaa in
dhulku qallalay maxaa
yeelay qoolleydii ma
ay soo noqon.





Ilaah wuxuu Nuux u sheegay inay tahay
waqtigii uu doonnida ka bixi
lahaa. Isku soo wada duuboo

Nuux iyo reerkiisa
ayaa xoolihii
ka dajiyay.



Nuux sidee buu ugu mahadnaqay!
Wuxuu dhisay
meel allabari oo
wuxuu caabuday
Ilaahii ka
badbaadiyey isaga
iyo goyskiisaba
daadadka xun.





Ilaah wuxuu
Nuux siiyay
ballanqaad
cajiib ah.

Marnaba dib uma
soo diri doono
daad si uu u
xukumo dembiga
aadanaha.

Ilaah wuxuu
siiyay
xusuusin weyn
oo ku saabsan
ballanqaadkiisii.

Qaanso roobaadka
waxay ahayd
calaamadda
ballanqaadka
Eebbe.



Nuux iyo
goyskiisuba waxay
heleen bilow cusub
daadka kadib. Waqti ka
dib, faracyadiisii ayaa
dib dunida u wada
noqday.



Quruumaha
adduunka oo dhami
waxay ka yimaadeen
Nuux iyo carruurtiisii.



Nuux iyo Daadkii weynaa

Sheeko ku koyti harafka Illahy
kutabshey, quduska eh

May lako heley

Bilowgii 6-10

"Eraygaaga galidiisu wala iftiimisaa."
Sabuurka 119:130



Dhamati



Doogan Baybalka ahi wala inoo sheegaye wala kisaabsan yaha ilaaheenna ajiibka ahi ina abuuray ee wala fadaay in uu ogaado usu.

Ilaahay wala ogyahay wali unifalnay wali hun, oo ugu weeran, dembi. inqaabta dembigu waa dhimasho, laakin ilahay aad kiin jecelyaha wala indiray igarshee shaleedi, ciise, ina kidhimada Iskutallabta oo la inqaabw dembiyadaada. Reed ciise ha noo noolaaday wala indareere iddah jannada! Madi adi faha santa ciise oo aad fadaase hooba kaa dhaafo dambiyadaada, walaagu sameeye fadee! Isaga kooye xalkun isin dhatiinyaa ki noolaadi fade, oo walishiin usu la noolaasan fadee.



Madi adi fahan santa inay taasi run tahay,
ilaah insheek:

Gacilye ciise, wala aaminsana in adi ileeh atah, oo
aad noqote magal in dhimada dembiyadayda, oo
hadadna aad mar lamaad noolaata, Fadlan
noolashayda hangal oo afi dembiyadayda,
si aan noolal jadiid helo hadda, oo maalin uun aan
u sii joogo inaan weligay kula joogo. Igu caawi
inaan ku adeeco oo aan adiga ugu noolaado sidii
canuggaaga. Aamiin

Akhri kitaabka quduuska ah oo
lahal hiraab kasta illah!
Yooxanaa 3:16

